RAMSEY COUNTY

AQAL FURAN

# Xarunta Adeegga Deegaanka Qorsheynta




*Fikrad farshaxan oo kaliya. Nakhshada u dambeysa waa ay ka duwanaan doontaa.*

## Horumarinta Adeegyada Caafimaadka Deegaanka

### Taariikhda

Sharciga gobolku waxa uu degmooyinka kaga baahan yahay inay meel u qorsheeyaan oo ayna maareeyaan household hazardous waste (qashinka khatarta ah ee guriga, HHW) ay soo saareen dadka deegaanka. Qashinka HHW waxaa kamid ah badeecadaha guriga ee aan la isticmaali karin amaba la rabin taas oo wax yeeli karta caafimaadka aadanaha ama deegaanka haddii si aan ku habooneyn loo daadiyo.

Iyada oo kusaleysan ra'yi celinta bulshada, Degmada Ramsey waxay raadineysaa inay horumariso adeegyada si loo xaqiijiyo in dadka deggan ay si badbaado leh oo ku habboon isaga qubi karaan qashinka HHW. Sanadki 2020 dhexdiisa, degmadu waxay sameysay sahanno iyo kalfadhiyo dhageysi si ay u soo aruuriso aragtida dadka deggan ee kusaabsan hagaajinta xarunta iyo adeegga. Dadka deggan waxa ay codsadeen:

- Adeegyada HHW oo dhamaystiran oo badan, oo ay kujiraan aruurinta qashinka elektarooniga ah iyo saacado dheeraad ah.
- Meel loogu talagalay in la geeyo qashinka HHW oo la heli karo, ku habboon, soo dhaweyn leh, oo ayna fududahay in la sahmiyo.
- Adeegyo wax ka qabta farqiga ka jira bulshooyinka isir ahaanta kala duwan ee degmada, dadka deegaanka ee da'da ah, iyo shakhsiyaadka gaadiid la'aanta ah.
- Adeegga qaadista qashinka HHW oo qiimo jaban ama bilaash ah.

### Xadidaadaha adeegyada ee goobta hadda jirta

Xarunta qashinka HHW hadda jirta sanadka oo dhan ee Degmada Ramsey waxaa iska leh oo maamula qandaraasle gaar ah, Bay West LLC. Bay West waxay adeeg tayo leh siineysay dadka deggan degmada tan iyo sanadki 2000.


Xarunta iyo adeegyada hadda jira ma daboolaan baahida bulshada ama kuma habboona aragtida muddada-dheer ee degmada iyada oo ay sabab u yihiin waxyaabaha soo socda:

- Lahaanshiyaha gaarka ah waxa uu xadidayaa xasilloonida barnaamijka ee muddada-dheer, xakameynta degmada iyo go'aan qaadashada barnaamijka. Sidoo kale uma oggolaanayso hannaan tartan oo loogu tartamayo shaqaalaha adeegga aruurinta qashinka.
- Xarunta hadda jirta ma ahan mid weyn oo ku filan aruurinta qashinka elektarooniga ah.
- Degmadu waxa ay ubaahan tahay meel dadka deegaanka ay ugu ballaariso helitaanka adeegyada, iyo in ay hagaajiso ku habboonaanta adeegyada.

### Nidaam HHW ah oo cusub

Iyada oo qeyb ka ah aragtida muddada-dheer iyo ka jawaabista ra'yi celinta bulshada, degmadu waxa ay soo saareysaa nidaam cusub oo aruurinta qashinka HHW ah. Hadafkeena waxa uu yahay inaan buuxino filashooyinka iyo baahida bulshada iyada oo diirada la saarayo sinnaanta iyo kamid noqoshada. Hagaajinta horeyba loo bilaabay ama la qorsheeyey waxaa kamid ah:

- Barnaamij cusub, oo dib u warshadeynta elektaroonigga ah oo bilaash ah oo lala kaashanayo shirkada deegaanka laga leeyahay ee Repowered.
- Xarunta Adeegga Deegaanka oo ay degmadu leedahay.
- Barnaamijka qaadista qashinka HHW.




***Goobta La Soo Jeediyey:***
1700 Kent Street, Roseville, MN 55117

## Waa maxay Xarunta Adeegga Deegaanka?

Xarunta Adeegga Deegaanka waxa ay noqon doontaa goob bulsho oo loogu talagalay adeegyada dib u warshadeynta waxyaabaha la geeyo. Waxa ay sidoo kale siin doontaa fursado waxbarasho waxayna bixin doontaa dib u isticmaalka iyo dayactirka kheyraadka.

**Xarunta cusub ee degmadu ay leedahay waxa ay:**

- Bixin doontaa goob bilaash ah oo la geeyo waxyaabaha dib loo warshadeyn karo, cuntada la tuuray, qashinka elektaroonig ah iyo qashinka HHW.
- Abuuri doontaa meel loogu talagalay waxbarashada bulshada iyo kheyraadka.
- Abuuri doontaa goob joogto ah oo loogu talagalay Xarumaha Dayactirka halkaas oo bulshada ay ka heli karto meel alaabada guryaha si bilaash ah loogu hagaajiyo oo ayna ka baran karaan xirfado dayactir oo qiimo badan.
- Bixin doontaa qolka dib u isticmaalida alaabada oo bilaash ah.

## Maxaa meeshan loo xushay?

Ka dib si taxaddar leh uga fiirsashada helitaanka, goobta iyo ku habboonaanta, iyo sidoo kale kharashka, saameynta deegaanka, iyo boos looga baahan yahay adeegyo badan, Degmada Ramsey waxay soo jeedinaysaa isticmaalka dhulka ay degmadu ku leedahay 1700 Kent Street ee Roseville. Goobtani waxay ku taalaa bartamaha waxayna buuxisay dhammaan baahida barnaamijka iyo sinnaanta ee goob ku habboon:

- Waxay qiyaastii tahay 5 acres waxayna awood u leedahay inay u adeegto 5 baabuur markiiba oo ayna saf u galaan ugu yaraan 20 baabuur.
- Waxay qaadi kartaa in ka badan 50,000 oo booqasho sanadkii.
- Waxay u dhowdahay waddo weyn, waddo degmo ama waddada weyn ee gobolka.
- Waxaa geli kara gawaarida waaweyn, oo ay kujiraan sideed boolaha.
- Waxay ku habboon tahay sagxadaha bannaanka ee bulukeetiga lagu fidiyo oo aan laheyn ama leh hoobad yar.
- Waxaa si fudud u aqoonsan kara oo heli kara dadweynaha.
- Waxaa geli kara isticmaaleyaasha gaadiidka dadweynaha, baaskiilleyda iyo dadka lugeynaya.

## Sidee tan loo maalgelin doonaa?

Maalgelintu waxa ay ka imaan doontaa haraaga sanduuqa maalgelinta qashinka adag ee degmada. Lacagta laga helo sanduuqa waxaa soo saara County Environmental Charge (Khidmada Deegaanka ee Degmada, CEC) taas oo ah khidmad adeeg oo ku saabsan adeegyada aruurinta qashinka. Dhismaha iyo hawlgalka xarunta ma kordhin doonaan khidmada CEC.



## Waxaan qabaa su'aalo, halkee ayaan idin kala soo xiriiri karaa?

Degmada Ramsey waxay rabtaa oo ay qiimeysaa su'aalaha iyo ra'yi celinta bulshada. Si aad u bixiso talo ama aad u weydiiso su'aalo, fadlan bogga Xarunta Adeegga Deegaanka ka booqo ramseycounty.us/ESC. Sidoo kale waad iska diiwaangelin kartaa si aad u hesho warbixinadi ugu dambeeyey ee kusaabsan Xarunta Adeegga Deegaanka iyo mashaariicda kale ee la xiriira hindisaha Horumarinta Adeegyada Caafimaadka Deegaanka.